

Sida ay dadku u isticmaali karaan shabakadda: Sida loo ballansan karo Kormeerid/Baqshimid

Booqo Columbus.gov/BZS kana gal Internet ka duwan Microsoft Edge iyo guji lifaaqa oranaya “Citizen Access” ee shabakadda



Guji “Schedule an Inspection”

Geli numbarka oggolaanshaha “permit number”, nambarka goobta “parcel number” ama nambarka jidka iyo magaca jidka:

- Kaliya isticmaal Qaybta Nambarka Jidka ‘Street Number’ iyo “Magaca Jidka” ‘Street Name’ Ha isticmaalin tilmaan ama nooca jidka.
- Halka Magaca Jidka ‘Street Name’ , % ayaa loo isticmaali karaa si boos celis ah haddii aanad hubin sida loo qoro jidka.
- Haddii magaca jidka yahay nambarro (i.e. Fourth Street), kadib geli 4 or 4TH.
- Si aad u baarto oggolaasho ka da’ a weyn seddex sanadood, baabi’i booska “Taariikdha biloowga” ‘Start Date’

Guji batoonka Baar “Search button”

Inspections

To view available inspection trips, click the "Record Info" d "More Details" item and open the "Application Information

If you need to buy an inspection trip before you schedule,

[Purchase an Inspection Trip](#)

After-hours inspections cannot be scheduled online. below:

[Request an After-Hours Inspection](#)

Upcoming

[Schedule an Inspection](#)

There are currently no inspections scheduled.

Bogga kuu muuqda waxaad ku awoodi kartaa inaad:

- Iibsato kormeer/baqshimid
- Codsato kormeer/baqshimid gelin danbe ah
- Balanshasho kormeer/baqshimid
- Hubiso kormeerada/baqshimadaha ballansan iyo sidoo kale kuwa la dhammaystiray

Guji batoonka ballansiga kormeerka/baqshimidda “Schedule an Inspection button”

Ka dooro nooca kormeerka/baqshimidda diiwaanka kuu soo baxa:

- Hal kormeer/bashimid oo kaliya ayaa la dooran karaa.
- Haddii aad u baahato inaad hal codsi ah hal maalin ah ku dalbato kormeero/bashimid badan, waxaad u baahanaysaa codsi weliba goonidiisa u geliso. Haddii noocyada kala duwan isku maalin la jadwaleeyey, hal safar oo kaliya ayaa loo jadwalayn doonaa. Si kastaba ha ahaatee, kormeerka qorshe eegista ee goobta, wuxuu keeni doonaa safar qoondo gaar ah.

Dooro maalinta aad rabto in kormeerka/baqshimidda lagu sameeyo:

- Saacadaha kormeerka/baqshimidda caadiga ah la sameeyo waa inta u dhaxaysa 8:30 subixii ilaa 3:30 galabkii.
- Ma awoodno inaan wakhtiyo cayiman oo kormeerka/baqshimidda la qabanayo ku siino.

Guji batoonka goobaaban (8:30 AM – 3:30 PM) si aad u eegto wakhtiyada la heli karo maalinka aad dooratay, kadibna guji sii soco “continue”. Fadlan ogoow, kormeerada/baqshimadaha waxaa la qaban karaa ugu horrayn 8:00 subaxnimo iyo ugu

Xaqiiji/hubi cinwaanka goobta iyo xogta xariirka ku lifaaqan inay sax yihiin.

Guji lifaaqa baddel xogta xariirka “Change Contact link” ee bogga si aad u qorto xog ka duwan tan uu kormeeraheenu hayo.

Guji lifaaqa ku dar xog dheeraad ah si aad xog ama tilmaan gaar ah ugu qorto ama uga codsato kormeeraha/baqshimaha. Inkasta oo aanan dammaanad qaadi Karin, kormeerayaasha sida ugu wacan ayey isugu dayi doonaan inay kuula macaamilaan sida ugu habboon sida helidda subaxii hore ama gelinka danbe iyo codsiyada hore u soo wicidda.

dhagsii dhame si aad u dhamaystirto jadwalka kormeerkaaga “Finish”

Hambalyo, waxaad jadwalaysatay/ballansatay kormeer/baqshimid aad ka dalbatay shabakadda ay muwaadiniintu isticmaalaan. Tan waxaa laga xaqiijin karaa adiga ka eega kormeerada/baqshimadaha soo socda ee laga helo bogga.